



Kaalmada dhaqaalaha ku soo codso adeeggeenna elekteroonigga ah

Adeeggeenna elekteroonigga ah ee Kaalmo Dhaqaale ayaad si deggan gurigaaga uga soo codsan kartaa lacagta, habeen iyo maalinba goorti aad rabto.

Waxaad ku soo codsaneysaa bogga

<https://minasidor.soderkoping.se/EkonomisktBistand>

Ekonomiskt bistånd - ansökan

Här kan du som är folkbokförd i Söderköpings kommun göra en ansökan om ekonomiskt bistånd. Din folkbokföringsadress ändrar du hos [Skatteverket](#).

Dina rättigheter och skyldigheter
För att ha rätt till ekonomiskt bistånd måste du göra vad du kan för att bidra till din försörjning. [Läs mer om dina rättigheter och skyldigheter.](#)

Ansökan via e-tjänst
Du loggar in och signerar din ansökan med e-legitimation som exempelvis Mobilt BankID. Är ni två som söker så ska ni båda signera ansökan med e-legitimation.

Följande behövs för e-tjänsten

- ✓ E-legitimation
- ✗ [Så här skaffar du e-legitimation](#)

Starta e-tjänsten

Hämta blankett

Sidee ayuu u shaqeeyaa adeegga elekteroonigga ah?

- ✓ Waxaad u baahan tahay moobil, kumbuyuutar ama aybaad, iyo BankID ama FrejaID si aad isu caddeyso qofka aad tahay.
- ✓ Marka ugu horraya ee aad codsiga sameyneyso, waa inaad ku buuxisaa macluumaadka oo dhan. Haddii aad mar kale soo sameyneyso codsi, xogta qaarkeed si ootomaatik ah ayaa loogu buuxin doonaa.
- ✓ Codsiga waxaad ku soo lifaaqi kartaa dukumiintiyo taageeraya sida faatuurada kirada, warqadda mushaarka, heshiiska shaqaaleysiinta ama rasiidyo kala duwan. Kuwaas kusoo degso kumbiyuutarkaaga ama sawir uga qaado moobilkaaga ee toos u geli adeegga elektaroonigga ah.
- ✓ Soo dir codsiga marka aad ku buuxiso macluumaadka oo dhan, aadna ku lifaaqdo wixii lifaaq ah.
- ✓ Ma jirtaa qof wax kula codsaneysa? Qofkaasi waa inuu oggolaadaa codsiga inta aanan aqbalin codsigaaga ka hor. Wuxuu qofku SMS ku helayaa linki, wuuna gelayaa oo wuxuu ku saxiixayaa BankID-giisa ama FrejaID.

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo codsigaaga elekteroonigga ah, waxaad gacanyare kala xiriiiri kartaa

taleefanka 0121-181 00. Waxaad sidoo kale wax dheeri ah ka akhrisan kartaa

<https://www.soderkoping.se/ekonomisktband>



SÖDERKÖPING.SE

Maxaa ka dib dhacaya?

Mar kasta oo ay arrinkaaga wax ka soo kordhaan waxaad markaaba uga warheleysaa xagga SMS-ta ama e-mailka.

Guji linkiga aad hesho si aad u aragto waxa kiiskaaga ka soo kordhay.

Ma u baahantahay inaad codsigaga ku kabto, tusaale ahaan, faaturada kirada ama caddeynta mushaarka? Waxaad markaas si fudud sawir ugaga qaadi kartaa moobilkaaga, waxaadna toos u gelin kartaa codsigaaga elekteroonigga ah.

Adeegga elekteroonigga ah waxaad:

- ✓ Toos uga akhrisan kartaa go'aankaaga marka uu diyaar noqdo.
- ✓ Ka arki kartaa inta lacag ah ee aad heli doonto iyo goorta lagu soo shubi doono.
- ✓ Ka arki kartaa xogta xiriirka ee gacanyarahaaga.
- ✓ Ka arki kartaa taariikhda codsiyadii aad horay u samaysay.
- ✓ Ka akhrisan kartaa, uguna diri kartaa farriimaha gacanyarahaaga.